

SUPPORTED BY

MAYOR OF LONDON

Faahfaahin Disability Living Allowance ee carruurta: Daryeelka iyo Dhaqdhaqaaqa

Disability Living Allowance ama DLA waa benefit ka guud ee Kaaba kharashka dheeraadka ah ee daryeel ilmahaaga.

DLA carruurta waa 2 qaybood, oo kala ah:

Qaybta daryeelka oo lagu bixiyo daryeelka saayid ah ee ilmahaagu ubaahan yahay.

Qaybta Dhaqdhaqaaqa oo lagu bixiyo haddii ilmahaagu caawimo xaga socodka ubaahan yahay.

Laga yaabaa in ilmahaagu helo lacagta DLA qayb ama 2da qayboodba

Faahfaahin qaybta daryeelka DLA

Ilmahu wuu heli karaa qaybta daryeel DLA laga soo billaabo marka uu saddex billood jiro ama uu dhasho haddii uu qabo xanuun naftiisa khatar ku keeni kara.

Qaybta daryeelka waxa lagu bixiyaa 3 xubnood ama heer

- **Ka Hoose**
- **Ka Dhexe**
- **Ka Sare**

Xubinta ama heerka aad heli karto wuxuu ku xidhaney:

Kolba daryeelka dheeraadka ah ee ilmahaagu ubaahan karo sida labiska, maydhista, isticmaalka musqusha iyo taageerada shucuurta

Haddii daryeelka dheeraadka ah iyo taageerada ilmahaagu ubaahan yahay tahay maalintii ama habeenkii ama habeen iyo maalinba.

Haddii ilmahaagu ubaahan yahay daryeel iyo kaalmo mar mar ah, waxa laga yaabaa innaad heshid heerka hoose ee qaybta daryeelka DLA

Ilmahaagu wuxuu heli karaa heerka dhexe ee daryeelka DLA haddii ay ubaahdaan daryeel dheeraad ah maalintii ama habeenkii.

Ilmahaagu wuxuu heli karaa heerka saree ee qaybta daryeelka DLA haddii ay ubaahdaan daryeel dheeraad ah maalinta iyo habeenka ama haddii cudur khatar ah hayo!

Faahfaahin qaybta Dhaqdhaqaaqa ee DLA

Qaybta Dhaqdhaqaaqa ee DLA waxa heli kara carruurta ubaahan caawimaad xaga dhaqdhaqaaqa ama socodka

Waxa qaybtan lagu bixiyaa mid ama laba heer:

- **Ka Hoose**
- **Ka Sare**

Heerka ilmahaagu heli karaa waxa uu ku xidhanyey kolba caawimaad dheeraad ah ee ubaahdo si uu socdo.

Heerka Hoose

Ilmahaagu waxa uu heli karaa heerka hoose ee qaybta dhaqdhaqaaqa DLA:

- Haddii uu socon karo, se ubaahan yahay kaalmo
- Ubaahdaan qof ilsha ku haya markay banaanka joogaan

Heerka hoose ee qaybta dhaqdhaqaaqa DLA waxaad heli kartaa marka ilmahaagu gaadho 5 sano.

Heerka Sare

Ilmahaagu wuu heli karaa heerka sare ee qaybta dhaqdhaqaaqa DLA Haddii:

Aaney socon Karin ama lagu 'tilmaami karo qof aan socon karin'

Kaliya socod gaaban karaan, si xanuun badan leh.

Aad ubukoonayaan, haddii ay socod isku dayaan

Dhago ama indho laayeen ama aad aragtiddoodu daciifsantay.

Carruurta qaar kaskoodu daciifyey ama autism qaba ayaa laga yaaba innay hellaan heerka sare ee qaybta dhaqdhaqaaqa DLA.

Heerka sare ee qaybta dhaqdhaqaaqa DLA waxaad ku heli kartaa ilmahaaga oo jira 3 sano

Booqo ciwaanka Intarnadka ee Contact wixii warfaafin ah ee quseeya DLA, iyo wixii la xidhiidha sida looga jawaabayo su'aalaha foomka DLA.

www.contact.org.uk/dla